A Message from

The Professional Development Team

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Waxaa la gaaray Xiligii Qaboobaha!



Wargayskaan sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF), waxaa loogu talo geley in bulshada Washington ee waxbarashada dhallaanka uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan Hormar Xirfadeed.

---

## Wargeyskaan...


- Xogaha Cusub ee Waaxda Waxbarashada Dhallaanka
- Akhbaaraha Early Achievers
- Waxyaabaha xiisaha leh ee ka cusub Nidaamka Xaqiijinta Waxbarashada!
- Caddeymaha iyo Ilaha Xirfadleyda ECE
- Su'aalo ku saabsan PACE?
- Tababarka Shaqada-Dhexdeeda ee Sanadlaha ah
- Xogaha Xeerka Fursadaha Billoowga Dhallaanka ee Loo Siman yahay: Naqshadeynta Labada Luuqad iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawaca
- Goobta Tababarka cusub ee DCYF- Waxaa la qabanayaa 2023!
- Taxanaha Webinarka Dayrta
- Ma raadineysaa Webinaradii Hore?
- Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay
- Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada
- Erayda Lake Washington Institute of Technology ee Barnaamijka Labada Luuqadood ee ECE
- Rukumo Fariimaha PD
- Sidee Ayaynu Nahay?


---

## Xogaha Cusub ee Waaxda Waxbarashada Dhallaanka




Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno qaab-dhismeed cusub oo cusub oo la xariira qaybteena Waxbarashada Dhallaanka oo dhaqangelaya **Oktoobar 16, 2022.**

Isbadelkaan wuxuu kor u qaadi doonaa waayo aragnimada, helida iyo adeegyada la siiyo carruurta, qoysaska, adeeg bixiyaasha, iyo bulshooyinka. Isbadelkaan wuxuu meesha ka saaraa caqabadaha iyo dhibaatooyinka jira si aan qaab fiican ugu adeegno bulshadeena.

### Kobaca Xirfadaha iyo Early Achievers Hadda waa Hal Koox!

Isbadelkaan xiisaha leh wuxuu isku keenaa labo koox oo qaabilsan waxbarashada Dhallaanka: Kooxda Kobaca Xirfadaha iyo Kooxda Early Achievers. Si wada jir ah, waxaan awooda saari doonaa taageerada shaqaalaha, tayada, waxbarista iyo waxbarashada!

Waaxda Waxbarashada Dhallaanka ee la cusbooneysiiyay waxaa kujira afar aag oo aad muhiim u ah, oo si gaar ah awooda u saaraya tayada iyo kor u qaadista sinnaanta isirada. Si aad aag kasta xog badan oga oggaato akhri xogaha cusub oo dhan.

---

## Akhbaaraha Early Achievers

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Maadaama labadeena koox si wada jir ah oga wada shaqeynayaan isbadelaan hoose, waxaan ku faraxsanahay inaan si wada jir ah ugu dhiirano isbadelkaan si aan si wanagsan ugu adeegno bulshadeena.

Waxaan fahansanahay in shaqada gudaha ay saameyso shaqada banaanka, yoolkeenu waa inaan ka dhigno mid wanaagsan. Sidee si **wanaagsan** kuugu adeegi karnaa? Halkee ayaad oga baahan tahay taageerooyinka?

Waxaan qorsheynaynaa inaan abuurno fursado badan si aan u helno jawaab celin inta aan sii wadeyno inaan kor u qaadno barnaamij isku dhafka ah. Haddii aad qabto fikrado hore ama aad wax iska waydiineyso arrimaha ku saabsan isbadelkaan, waan jeclaan lahayn ka qaybqaadashadaada inta lagu jiro webinarka Diseembar. Webinarka Diseembar waxaa lagu qaban doonaa af Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali wuxuuna noqon doonaa meel la isugu yimaado si uu nooga caawiyo qaabeynta habka aan ula macaamilno bulshadena sanadka 2023.

Waxaan rajaynaynaa inaan kugu arki doono halkaas!

---

## Kooxda Shaqaalaha Raadinta Xubnaha!



Early ***Achievers iyo Kooxda Fulinta Shaqada*** waxay u kulmaan si joogto ah waxayna jeclaan lahaayeen inay ku dhageystaan! Waa maxay Tayada iyo Kooxda Fulinta Shaqada?

Ujeedada Kooxda shaqada waa in kor loo qaado Early Achievers ayadoo loo maraayo sinnaan iyo wada shaqeyn. Inta lagu jiro kulanada, waxay eegaan xogta, waxayna ka wad hadlaan caqabadaha iyo guulaha waxayna sameeyaan soojeedino si kor loogu qado barnaamijka.
Kooxda Shaqada waxaa kujira adeeg bixiyaasha; iskaashatada iyo saamileyda.

Kooxdu waxay kulmaan Talaadada saddexaad ee bil walba laga bilaabo 12:30 ilaa 2 p.m.

Haddii aad xiiseynayso inaad gacan ka geysato kor u qaadista sinnaanta ee kajirta xarumaha waxbarashada dhallaanka, fadlan la xaariir Ellen Zito.

---

## Maqaayada Isgaarsiinta Early Achievers



Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno inaan furi doono Maqaayada Isgaarsiinta Early Achievers!

Nofeembar 1deeda, Iskaashato badan oo katirsan Early Achievers, qandaraaley, iyo adeeg bixiyaal ayaa iskugu yimaaday mar koodii koowaad Maqaayada isgaarsiinta. Waxaan helnay falcelin aad u wanaagsan oo ku saabsan baahiyaha isgaarsiinta ee ay tahay inaan awooda saarno.

Maqaayada isgaarsiinta waxay naga caawin doontaa sidii kor loogu qaadi lahaa isgaarsiinada la xariira Early Achievers. Kooxdu waxay naga caawin doontaa qorsheynta, naqshadeynta iyo awood saarista fariimaha daboolaya baahiyaha adeeg bixiyaasha, qoysaska iyo iskaashatada.

Waxaan jeclaan lahayn inaan helno warbixino adeeg bixiye oo dheeraad ah! Haddii aad xiiseyneyso inaad ka qaybgasho, fadlan la xariir Jill Stroma. Kooxdu waxay kulmaan Talaadada 1aad ee bisha laga bilaabo 1:30 illaa 3 p.m.

---

## Tilmaamaha Cusub ee Hawlaha Qeybgalayaasha ee Early Achievers

Tilmaamaha Hawlaha Qeybgalayaasha ee Early Achievers waxaa la cusbooneysiiyay dhawaan si loogu "daro" siyaasad cusub iyo shuruud dhaafitaano Muujinta Muuqaalka.

Tilmaamaha waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali waxaana laga heli karaa bogga webka Ilaha iyo Taageerada (Supports & Resources) ee Early Achievers.




---

# Waxyaabaha xiisaha leh ee ka cusub Nidaamka Xaqiijinta Waxbarashada!



Department of Children, Youth & Families (DCYF) waxay ku faraxsan tahay in dhowr isbadel lagu sameyn doono:

- Nidaamka xaqiijinta waxbarashada ee loogu talagalay daryeel bixiyaasha daryeelka carruurta ee haysta oggolaanshaha Early Achievers
- Adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta ee haysta shahaado caalami ah.

Nidaamka la cusbooneysiiyay wuxuu yareeyaa caqabadaha, waqtiga iyo kharashaadka adeeg bixiyaasha.

**Akhri cusboonaysiinta oo buuxda!**

---

# Caddeymaha iyo Ilaha Xirfadleyda ECE



Xirfadleyda waxbarashada dhallaanka waxay muhiim u yihiin mustaqbalka carruurteena. Xirfadleydu waxay bixiyaan aqoon, daryeel tayo sare leh iyo waxbarasho si ay oga caawiyaan carruurta yaryar sidii ay u gaari lahaayeen hormar wanaagsan.

Yoolkeenu hay'ad ka ahaan waa inaan qof walba u diyaarino wado guul leh oo ay ku helayaan yoolalkooda xirfadeed. Fariimahaan waxaa ku qoran qaar kamid ah ilaha muhiimka ah iyo xasuusino si ay xirfadleyda oga caawiyaan sidii ay u gaari lahaayeen yoolalkaas.

***Waan kaaga mahadcelinaynaa wax kasta ood sameyso ood ku taageerayso carruurta, dhallaanka, iyo qoysaska kunool gobalka Washington. Mahadsanid!***

---

## Ilaha Xirfadaha Shaqaalaha



DCYF waxay sii wadaa inay abuurto ilo loogu talagalay xirfadleyda waxbarashada dhallaanka si ay u fahmaan dookhyadooda ayna oga soo baxaan heerarka ruqsada shaqaalaha. Fiiri ilihii kugu dambeeyay!

- **Hage loogu talagalay Qorshooyinka Hormarka Xirfadaha (Professional Development Plans, PDP) oo loogu talagalay Adeeg bixiyaasha Waxbarashada Dhallaanka:** Hagahaan wuxuu bixiyaa dulmar guud oo ku saabsan wadiiqo kasta oo waxbarasho wuxuuna abuuraa qorshe lagu gaaraayo wadiiqadaas. Ingiriis | Isbaanish
- **Hage loogu talagalay Shuruudaha Tababarka ee Adeeg bixiyaasha Waxbarashada Dhallaanka ee Ruqsada haysta:** HagahaAn wUXUU dulmar ka bixinayaa shuruudaha tababbarka ee daryeel bixiyayaasha waxbarashada dhallaanka ee haysta ruqsada. Ingiriis | Isbaanish
- **Xaashida Qorshaha Hormarka Xirfada (PDP):** Adeeg bixiyaasha waxbarashada dhallaanka waxay haystaan 5 ama in kasii badan oo ay oga soo bixi karaan shuruudaha waxbarashada ruqsadeysan. Xaashidaan shaqada waxay ka caawisaa daryeel bixiyaha inuu dejiyo qorshe lagu daboolaayo waxbarashada. Ingiriis | Isbaanish

---

# Su'aalo ku saabsan PACE?

***Ma qabtaa wax su'aalo ah oo ku saabsan PACE?***

***Ma ogtahay in PACE ay kugu habboon tahay iyo in kale?***

***Ma doonaysaa inaad ogaato sida loo dhammeystiro PACE oo u dhiganta shuruudaha waxbarashada doorka shaqada?***




Hel jawaabaha su'aalahaaga oo baro xog badan oo ku saabsan Imtixaanka U qalmida Oggolaanshaha ee Bulshada (Provider Access to a Community Equivalent, PACE), oo ay kujiraan sida la iskaga diiwaangeliyo tababarada PACE ee diiwaanka gashan kuna jira bogga webkeena la cusbooneysiiyay!

**Bogga webka PACE**

---

# Tababarka Shaqada-Dhexdeeda ee Sanadlaha ah

Daryeel bixiyaasha xanaanada carruurta ee ruqsada leh waxay u baahan yihiin inay dhammaystiraan 10 saacadood oo tababar gudaha ah sannadkiiba mar kadib marka la dhammeeyo shuruudaha tababarka billoowga ah (Aasaaska Xannaanada Ilmaha, Aasaaska Da'da Dugsiga, ama Aasaaska Dabiiciga ee banaanka).



## Goorma ayay tahay inaan dhameystiro tababarkayga?

- 10 saacadood oo ah tababarka Adeegga waa in la dhameeyo kahor Diseembar 31 deeda, 2022.

## Sidee ku helaa tababarka la ansixiyay si loo dhameystiro?

- Isticmaal aalada "Lagu Raadiyo Tababarka (Find Training)" ee Agabka Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaangelinta Xogta (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) si aad u hesho tababarka uu gobalku ansixiyay.

## Ma heli karaa saacadaha shaqada ee tababarka oo aanu bixin tababaraha Gobolku ansixiyay?

- Haa! Si aad u hesho waayo aragnimada waxbarashada la dhameystiray ee tababarka uusan gobalku ansixin, sida shirarka gobalka, waxaad soo gudbin kartaa **Codsiga Soojeedinta Sii wadista Waxbarashada (Continuing Education Proposal, CEP)** si aad u codsato saacadaha tababarka Shaqada ee sanadlaha ah.
    - Si aad u barato xog badan oo ku saabsan dookhaan ama tilmaamaha tallaabo-tallaabada ah, booqo Bogga Webkeena ee Ilaha Agabka Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaangelinta Xogta (MERIT Resource webpage) ood ka helaysa 'Tababarka' hoos tiisa.
- Sidoo kale waxaad heli kartaa ssaacadaha tababarka shaqada ee **shaqada kuleejka** ee la xariirta tayada muhiimka ah ee Gobalka Washington ee loogu talagalay Waxbarashada iyo Daryeelka Dhallaanka ama Xirfadlayda Da'da Dugsiga. Waa inaad codsiga waxbarashada kusoo gudbisaa MERIT waana inaad bixiso nuqulka natiijadaada aan trasmiga ahayn. Sanadkii waxaa lasoo gudbin karaa jaraa saddex koorso. Dhamaan duruusta saacadaha shaqada waa in lagu dhamaystiraa sadexdii sano ee lasoo dhaafay.
    - Si aad u barato xog badan oo ku saabsan dookhaan ama tilmaamaha tallaabo-tallaabada ah, booqo Agabka Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaangelinta Xogta (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) ee laga helaayo qaybta 'Waxbarashada' hoosteeda.

### Ka waran haddii aanan dhameysan 10 saacadood ee tababarka ah inta lagu jiro 2020 ama 2021 sababo la xariira aafada COVID-19?

- Ruqsad bixiyaashu ma sheegi doonaan saacadaha maqan sannadihii hore.
- Daryeel bixiyaasha ayaa dib u bilaabay dhamaystirka 10 ka saacadood ee sanadlaha ah ee saacadaha tababarka gudaha laga bilaabo Janaayo 1, 2022.
  - Eeg **Wax ka beddelka Tababarka ee looga falcelinayo** COVID-19 si loo helo xogtii ugu danbeysay. [Ingiriis] [Isbaanish] [Soomaali]

---

## Xogaha Xeerka Fursadaha Billoowga Dhallaanka ee Loo Siman yahay: Naqshadeynta Labada Luuqad iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawaca

Kooxda Kobaca Xirfada (Professional Development, PD) waxay haysataa labo qaybood oo wayn oo la xariira Xeerka Carruurta ee Fair Start (Fair Start for Kids Act, FSKA) oo taageera kor u qaadista tayada daryeelka ilmaha ee Washington ayadoo loo maraayo shaqada shaqaalaha dhallaanka, waa:

- **Hawlaha Labada Luuqadood**
  - Labada luuqad/waxbarashada luuqadaha badan waa nooc waxbarashada kamid ah oo ardayda lagu baro waxbarashada, dhaqanka, iyo nuxurka afkooda hooyo iyo hal ama in ka badan oo luuqado kale ah.
  - Marka loo eego FSKA, DCYF waxaa laga doonayaa inay dejiso hawlaha labada luuqadood oo loogu talagalay daryeel bixiyaasha ruqsada haysta ama shahaado haysta ee aqbala kaalmada gobolka.
- **Daryeelka lala socda ee la xariira Waxyeelada**
  - Xiriirada wanaagsan ee u dhexeeya carruurta iyo dadka waaweyn ayaa muhiim u ah abuurista qaab dhismeedka maskaxda si ay u sameeyaan kobac bulsho oo caafimaad leh, shucuur, iyo horumar.
  - Sida ku xusan FSKA, waaxdu waxay bilaabaysaa dadaal dhamaystiran si ay kor ugu qaado taageerooyinka ka warhaynta dhaawaca iyo bogsiinta udub dhexaad u ah xirfadlayaasha dhallaanka. Taageerooyinka waxaa kujira abaal-marin lacageed oo la siiyo daryeel bixiyaasha kor u qaada aqoontooda, xirfadahooda, iyo kartidooda dhaawaca laga warhaayo; fursadaha horumarinta xirfadeed, oo ay kujiraan tababarka; iyo kordhinta helitaanka qalabka baarista kobaca.

Marna yaysan ku dhaafin xog cusub! Si aad u hesho waqtiga ugu habboon macluumaadka ku saabsan shaqadaan, ka eeg Qaybta Xeerka ursadaha Billoowga Dhallaanka ee Loo Siman yahay ee Bogga Shabakadda Waxqabadyada Hadda:

**Bogga webka Hindisaha Hadda**

## Xogaha cusub ee la xariira Hawlaha Labada Luuqadood & Ilaha Horumarka Xirfada



### Sameynta Xiriirka Xidhmada Ilaha

Ilahaan balaaran waxay bixiyaan soojeedino, agabyo, iyo casharo tusaale ah waxayna siiyaan macalimiinta adeegsada Tilmaamaha Waxbarashada Dhallaanka iyo Horumarinta ee Gobolka Washington iyo agabyada Sannadaha Hore ee Qiimeynta iyo Naqshada Waxbarashada Aduunka ee Caalamiga ah (World-class Instructional Design and Assessment, WIDA) si loo qorsheeyo fursado waxbarasho oo loo siman yahay oo loogu talagalay carruurta yaryar ee ku hadla luuqadaha badan.

Gal Qalabka Making Connections

### Webinarka Xidhmada Ilaha WIDA

WIDA Early Years & DCYF waxay ka wada shaqeeyaan inay qabtaan webinar aad muhiim u ah oo ku saabsan Xidhmada Ilaha ee la xariira Hawlaha Muhiimka ah. Xidhmadu waxay bixissaa tilmaamo iyo soojeedino wax ku ool ah oo loogu talagalay bixiyaasha adeegga ee taageerada carruurta barta luuqadaha badan iyo qoysaskooda.

**Isdiiwaangeli oo Kusoo Biir! Talaata, Diseembar. 13 | 1-2 galabnimo.**

**Halkan Iska Diiwaangelin**

Inta lagu jiray webinarka halka-saac ah, waxaa looga hadli doonaa macluumaadkaan soo socda xidhmada isha:

- Tilmaamo loogu talagalay in lagu taageera ardayda luuqadaha badan iyo qoysaska
- Soojeedino wax ku ool ah iyo codadka goobta
- Fursad la xariir dib isku milicsiga
- Tusaalayaal muujinaaya wadiiqooyinka shaqsiyaad oo la xariira wax isbarida
- Taageero ku aadan gaarista go'aanka ka warhaynta xogta

## Tababarka Ardayga Barta Labo Luuqadood

Tababarka Ardayga Barta Labo Luuqadood ee DCYF wuxuu baranayaa dib u eegis iyo nidaamyo balaaran. Waxaan rajaynaynaa in wax ka badelada lagu dhameystiri doono kahor Xagaaga 2023.

**Codsiga Hawlaha Labada Luuqadood**

DCYF waxay la shaqeynaysaa UW Cultivate si ay u dhisaan codsiga Hawlaha Labada Luuqadood. Xog badan oo ku saabsan Gu'aan Soo Socda. Ogeysiisyada waxaa lagu sameyn doonaa Wargeyska PD. Iska qor halkaan.

---

# Cusboonaysiinta Dhaqanka Daryeelka-Xog-ogaalka ah ee loo yaqaan 'Trauma-Informed Care'

DCYF waxa ay balaadhinaysaa Taageerada dhaqanka Daryeelka-Xog-ogaalka ee loo yaqaan 'Trauma-Informed Care' ee bixiyayaasha u qalma iyada oo loo marayo FSKA. (Senate Bill 5237),



Tan waxaa ku jira maalgelinta DCYF ee waxbarashada iyo tababarka dhaqanka Daryeelka-Xog-ogaalka ee loo yaqaan 'Trauma-Informed Care'

Fadlan ka soo qayb gal Oktoobar Webinar si aad wax badan uga ogaato abaalmarinta maaliyadeed. Trauma-Informed Care and Healing Centered Supports.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan abaal-marinaha maaliyadeed ayaa dhawaan laga heli doonaa boggayaga website-ka. Current Initiatives webpage soon.

---

# **Goobta Tababarka cusub ee DCYF- Waxaa la qabanayaa 2023!**



Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno hirgelinta Nidaamka Maareynta Waxbarashada cusub (Learning Management System, LMS) ee imanaaya 2023!

Goobta Tababarka Cusub ee DCYF (oo dib loo magacaabi doono), waxay noqon doontaa meel laga helo tababar, tababar dhameystiran, maamulida tababarka iyo shirarka/dhacdooyinka gaarka ah, iyo meel laga codsado inaad noqoto tababare gobolku ansixiyay.

Waxaan sameyneynaa hab ku saleysan isticmaale si aan gacan uga geysano u wareegida goobta tababarka cusub. Inta lagu jiro tallaabo kasta oo la sameynaayo, waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa bulshadeena si aan wax uga barano iyaga, si aan u bixinno taageerada ugu fiican. Waxaa jiri doonaa dhowr qaab oo ay dadku ku dhiiban karaan falcelintooda:

## Qaybaha Falcelinta iyo Tijaabada Ku saleysan Isticmaalaha

- **Tababaraasha uu ansixiyay Isticmaaluhu iyo Ururada Tababarka**: Waqti xaadirkaan, waxaan la shaqeyneynaa tababarayaasha iyo dadka maamulaha tababarada goobta. Waxaan la shaqeyneynaa Tijaabada Lagu saleysan Isticmaalaha si aan wax oga barano qaabka bulshada sameyneysa tababarka u adeegsato goobta iyo meelaha looga baahan yahay taageerada.
- **Adeeg bixiyaasha Daryeelka Ilmaha/Tababaraasha iyo bulshada kale ee waxbarashada dhallaanka**: Waxaan la shaqeyn doonaa bulshadaan xoogaa inta lagu jiro sanadka cusub. Waxaan ku dhawaaqi doonaa qorista shaqaaale loogu talagalay qaybaha jawaab celinta iyo Tijaabada Isticmaalaha ku-meel gaarka ah anagoo adeegsanayna Wargeysyada PD. Haddii aad jeclaan lahayd inaad qayb ka noqoto kulanadaan, la xariir Marlene White ama iska qor wargeyska PD.

## Dib u magacaabida goobta tababarka ee cusub

- Waxaan qorshaynaynaa inaanu qaadno hab wada shaqayn ah oo aanu ku magacaabayno Goobtaan Tababarka ee cusub waxaana doonaynaa fikirkaaga inaan maqalno. *Xog dheeraad ah ayaa dhawaan la heli doonaa!*

---

# Taxanaha Webinarka Dayrta



Webinarka Oktoobar wuxuu awooda saaray **Daryeelka Xarunta Soo kabsashada iyo Dhaawacyada Lala socdo:** halkaan ka daawo dhammaan xogaha cusub!

*Fadlan ogsoonoow: waxaan ka shaqeyneynaa inaan ka dhigno webinarkaan mid lagu heli karo Af Isbaanish. Marka duubistu diyaar tahay waxay layf ka noqon doontaa bogga webka Webinarka (Webinars).*

## Webinarada Nofeembar iyo Diseembar

Webinarada Nofeembar iyo Diseembar waxay noqon doonaan taxanayaal labo qaybood ah oo awooda lagu saaraayo aruurinta falcelinta si loo jiheeyo taxanayaasha webinarada mustaqbalka. Waxaan dooneynaa inaan badelno habka aan u maamulno webinarada oo aana barano sida ugu wanaagsan ee loola macaamilo bulshadeena. Webinarada waxaa lagu qaban doonaa layf ayagoo ku baxaaya **Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali.**

Haddii uu ku dhaafay webinarka Nofeembar, fadlan nagula soo biir kan Diseembar si aad u dhiibato fikirkaaga.

**Halkan Iska Diiwaangelin!**

---

## Ma raadineysaa Webinaradii Hore?

Siminaarada waa la duubaa waxayna toos uga socdaan boggeena Webinarka (Webinars).



*Haddii aadan heli karin siminaarka aad raadineyso, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno inaan duubno oo aan soo gelino. Waxaan kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga.*

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan simanaar gaar ah, iimeel u dir Marlene White.

**Booqo Siminaarada PD**

---

## Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay



Ma waxaad tahay tababare ama ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato barnaamijka Tababarka ee Gobolka-Washinton uu ansixiyay? Wargeyska Growing the Workforce ee u dambeeyay wuxuu ku wajahan yahay Tababarayaasha uu Gobolku ansixiyay.

Liis dhammaystiran oo ku saabsan Wargeysyada (Newsletters) Growing the Workforce waxaa laga heli karaa bogga Wargeysyada DCYF:

**Wargeysyada**

---

## Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada



DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan iyo deeqaha waxbarashada si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada dhallaanka. Si aad ula socoto Xogaha barnaamijyadaan iyo waxbarashada kale, booqo:

**Deeqa waxbarashada, kaalmooyinka, iyo abaalmarinada**

---

# Erayda Lake Washington Institute of Technology ee Barnaamijka Labada Luuqadood ee ECE

## Deeqaha Waxbarashada Early Achievers: Sheeqooyinka Guulaha



Fasaladaan micno badan ayay ila leeyihiin sababtoo ah waxaan wax badan ka bartay xirfadaha, kartida, horumarka, nafaqaynta, dhaqanka, iyo caqabadaha carruurta, waxay ahayd waayo-aragnimo aad u fiican aan ka helayay sanadka oo dhan. Waxaan la kulmay dad aad u wanaagsan, macalin René iyo macalimad Samantha waa dad aad u fiican oo leh dareen aad u naxariis badan, aad ayayna ardayda ugu dhiiri galiyaan inay horay u socdaan, waa dad caqli badan leh. Waxay ii ahayd farxad inaan dhigto fasalkooda.

**-Aurelia D.**

---



Fasalada labada luuqadood ee aan ku qaatay LWtech waxay sababeen inaan la cajiibo dhaqankayga aana xushmeeyo kan dadka kale'. Waxaan bartay sida isku kaashidu u furo albaabo badan ayadoo laga bilaabaayo da' yar iyo sida aysan waligeed aadan marna ka gobaabeen inaad naftaada barto wax aad u xiiso badan.

-**Mitzi R.**

---

Fasalada ayaa ii ahaa kuwo aan ka helo caawimaad wayn tan iyo markii ay ka dhigeen shaqadayda carruurta mid waxtar leh oo xiiso leh. Macalimiintu waxay qabteen shaqo aad u wanaagsan, fasal walba waxay ka dhigeen mid aad u xiiso badan, waxayna ku sameeyeen qaab ay fududahay in la fahmo iyadoo aan la sheegin inay yihiin dadka qosol badan oo ka dhigaysa fasalka midaan qorsooneyn inkastoo aan interneetka ku qaadanaayo hadana waxaan dareemayaa inaan fasalka ku dhex jiro. Hadda waxaan qof walba kala hadlaa sida cajiib uu u yahay dugsiga LWTech.

-**Silvia C.**



---



Qaadashada xiisadaha Machadka Teknoolajiyada Lake Washington, waxay muujineysaa "Albaabka fursadaha waaweyn", waxaan ka bartay xirfadayda ah macalinimada, ammaan, kalsooni, noqoshada kanaalka waxbarashada farsamooyinka cusub ee waxbarida, iyo kor u qaadista habka Waxbarashada Dhallaanka.

**Yenny R.**

---

Aniga, fasalada aan ku bartay LW Tech waxay iiga dhigan yihiin fursado aan ku furay albaabo cusub iyo fursado iga caawiyay xirfada nolashayda. Fasaladaan waxay iga caawiyeen inay wax badan ka barto Waxbarashada Dhallaanka, inaan kor u qaado xirfadaha shaqadayda. Si aan u barto farsamooyin cusub oo aan kaliya waxtar u lahayn carruurta kujira daryeelkayga, laakiin sidoo kale si aan kor kugu qaado fayaqabkayga shakhsi ahaaneed ee fasalka dhexdiisa. Qaabkaan marka aan sameeyo, waxaan bixin karaan daryeel tayo sare leh oo ay helaan carruurtayda dhigata fasalka.

**Elizabeth L.**



## Nala wadaag!

Miyaad heshey deeqda Early Achievers oo ma doonaysaa inaad noo sheegto sheekadaada? Waxa aad sheekadaada kusoo dirtaa Khabiirka Waxbarashadeena Waxbarashada Dhallaanka (Early Childhood Education, ECE), Sharene Leek, si loogu daro wargeyska soo socda.




# Rukumo Fariimaha PD

*Growing the Workforce* waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha waxbarashada hore.

*Wargeysa PD* waxaa loogu talagalay inuu la socodsiiyo bulshada waxbarashada dhallaanka ee Washington dhamaan shaqooyinka ee la xariira Hormarka Xirfadaha.

**Rukumo**

*Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa boggeena Wargeyska (Newsletters).*

# Sidee Ayaynu Nahay?

Fadlan nala soo socodsii sida aan u sameyneyno samaynta degdeg ah xog aruurin saddex-su'aal ah.

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xidhidhaa Marlene White.

